



Australian Government

COVID-19  
VACCINATION

# Ardayda caalamiga ah ee jooga Australiya waxay heli karaan tallaalada COVID-19

Tallaallada COVID-19 waa iskaa wax u qabso waana u bilaash qof walba oo jooga Australiya. Ardayda caalamiga ah ee da'doodu tahay 12 sannadood iyo wixii ka weyn ee wax ka baranaya Australiya way heli karaan tallaalka COVID-19. Uma baahnid kaadhka Medicare si aad uga heshid tallaalkaaga rugta tallaalka ee dowladda.

Waxaad u baahan doontaa laba dhoosoo isla tallaal ah, si ay u noqoto ugu waxtarka badan. Tallaallada COVID-19 waxay kaa caawinayaan kahortagga inaad aad u bukooto.

Si aad u heshid rug caafimaad oo aad u ballansatid tallaalka COVID-19 adiga oo adeegsanaya raadiyaha rugta tallaalka, booqo [covid-vaccine.healthdirect.gov.au](https://www.covid-vaccine.healthdirect.gov.au)

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo [health.gov.au/covid19-vaccines-languages](https://www.health.gov.au/covid19-vaccines-languages) ama wac **1800 020 080**.

Adeegyada af-celin, wac **131 450**

